Runta La Sheego (Alsidqu)
Qaybta 1"aad

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على أشرف الأنبياء والمرسلين نبينا محمد وعلى آله وصحبه أجمعين

Mahad oo dhan Alaah iska leh Rabiga caalam ka abuurey Allaha ha amaano nabigeena sharafta badnaay anbiyada kan ugu fadliga badan&anbiyada lasoo direy dhamaantood

قال اللّه تعالى

Ilaahey sareeyey(oo wax kasta kasreeya) wuxuu yiri

يا أيها الذين آمنوا اتقوا اللّه، وكونوا مع الصادقين}

Kuwa Iimaanka Dhabta ah Laga Helay Alle Ka Cabsada(Ilaahey Ka Baqa) Ee Waxaad Noqotaan Kuwa Runta Sheega.

Suurada Towbah Aayada 119 (التوبة 119):

وقال تعالى

Sidoo Kale Ilaahey sareeyey(oo wax kasta ayuu kasareeyaa) wuxuu yiri :

والصادقين والصادقات

Ragga Kuwa Run Sheega Badan & Dumarka Kuwa Runta sheeg allaah wuxuu u diyaarshey Dambi Dhaaf iyo Ajri aad u weyn

Suuradda Axzaab Aayada 35 (الأحزاب 35):

وقال تعالى

Sidoo Kale Ilaahey sareeyey(oo wax kasta ayuu kasareeyaa) wuxuu yiri :

فلو صدقوا اللّه لكان خيرا لهم }

Hadeey Runta Sheegi Lahaayeen Ayaa U Kheyr Badnaan Lahayd .

Suurada Muxamed Aayada 21 (محمد21):

عَنْ ابن مسعود رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ عَنْ النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم قال

Cabdulaahi Ibnu Mascuud رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ Allaha Ka Raali Noqda **Nabiga** صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم Wuxuu Yiri:

إن الصدق يهدي إلَى البر وإن البر يهدي إلَى الجنة؛

Runta Waxay Kugu Hanuunisaa Wanaaga (Samafalida Yacni Ixzaanka) ,Wanaagana Wuxuu Ku Geeyaa Jannada (Kugu Hogaamiyaa ,Sababna Unoqdaa Inaad Jannada Gasho)

وإن الرجل ليصدق حتى يكتب عند اللَّه صديقا،

Qofka Bani Aadanka Wuxuu Ku Hadlaa Runta Inta Ilaahey Agtiisa Looga Qoro Runle (Yacni Run Badane)

وإن الكذب يهدي إلَى الفجور وإن الفجور يهدي إلَى النار

Beenta Waxay Kugu Hanuunisaa Gaalnimadda (Faajirnimo Yacni Xumaanta) ,Gaalnimadda Waxay Ku Geeysaa Naarta (Kugu Hogaamiyaa ,Sababna Unoqdaa Inaad Naarta Gasho) Walciyaadubilaah 'Alaan Ka Magan Galney ''

وإن الرجل ليكذب حتى يكتب عند اللَّه كذابا ؛

Qofka Bani Aadanka Wuxuu Ku Hadlaa Beenta Inta Ilaahey Agtiisa Looga Qoro Beenle, {Beenloow Been Badane)

Waxaa isku waafaqay Bukhaari & Muslim مُتَّفَقٌ عَلَيْه

وقيل أبي سعيد . عَنْ أبي ثاب.

Abii Thaabit Sidoo kale Waxaa la Yiri Abii Saciid

وقيل أبي الوليد سهل بن حنيف وهو بدري رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ أن النبي صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم قال

Sidoo kale Waxaa la Yiri Abii Waliid Ibnu Sahal Ree Badar ahaay رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ Allaha Karaali noqdo Nabigaa صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم Wuxuu Yiri:

من سأل اللَّه تعالى الشهادة بصدق بلغه اللَّه منازل الشهداء

Qofkii Allaha Sareeya Weydiista Shahaado (Dare alle Naftiisa Ubixiya) isagoo Run ay ka tahay ilaahey Wuu gaarsiiyaa Darajada Shuhadda (Waa dadka Jihaadka Ku Dhinta Layiraahdaa Shuhadaa)

وإن مات عَلَى فراشه

Haba Ku Dhinta Haduu Doono Sariirtiisa Dushiisa (Korkiisa) Yacni waxaa loo Jeeda Isagoo Dagaal Ka Qaybgalin Allaha Kadhigo Ajarkaas Uu Niyeeystey Wuu Heli

Waxaa Wariyey Imaam Muslim رَوَاهُ مُسْلِمٌ

Faai"dooyinka Runta Lasheego

Runta Oo la sheego waa wax diinteena na amartey

1- Runta Waa arin ilaahey na amarey oo waajib ku ah qofkasta oo muslin ah

2- Runta Waa hadyigii nabigeena suubanaay & Anbiyada caleyhi salaam

3-Runta Waxaa aad noogu booriyey allaah iyo Sunnadii Rasuulka

4- Waa furihii jannada iyo liibaanta danbe ee aakhiro run sheegayaasha kubadbaadayaan

5- Runta Waa Badbaadada aduunyadda iyo maalinta Danbe ee aakhiro

6-Runta dadka ayeey kuu soo dhoweysa weyna ku jeclaysiisaa tusaale : xaaskaada runta hadey kugu barato kalsooni buuxad helaysaa.

7- Runta waxay abuurtaa ama dadka kaaga dhigtaa mid kugu kalsoonyihiin xiliwalba iyo goob kasto la joogo.

7-Runta waxay kuu noqotaa mid dadka kula nool ay marqaati kaaga noqdaan oo ay yiraahdaan hebel ama heblaayo waa qof runbadan oo warkiisa la rumeeyo ama rumeysto.

8-Runta waxay abuurtaa jawi aad u degan oo qofka runta sheega ummada maba xagxagato Yacni qof lala doodo maahin warkiisa waa qof cadyahay.

9-Runta waa tan keenta ilmahaagaa kaa rumeysto oo hadaad tiraahdo beri nacnac ayaan kuu keeni oo aadan u keenin waxaad tahay **beenloow** walaalkeyga muslinka ahoow oo Rasuulkeena scw صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم wuxuu yiri haddaad qof tiraahdo waxaan qaado oo aad siinin beenloow ayaad tahay iska jir marka sheydaanka yuusan ku kadin.

10- Runta walaalaha muslimiinta ayeey farax galisaa sheydaana wey ka careysiisaa

Khasaaraha Beenta Leedahay

Beenta Oo la sheego waa wax diinteena ay nooga digtey oo ma banaana in qofka been caadeysta oo xirfad kadhigta marka kitaab wa sunnah ayeey xaaram ku tahay beenta.

1-Beenta waxay kaa fogeysaa allaah

2- Beenta waa calamaddaha munaafiqinta(Muunaafiqintana naar daran ayeey leeyihiin)

3-Beenta waxay saaxiib kaala dhigtaa sheydaan iyo xisbigiisa.

4-Beenta waxay kaa fogaaysaa dadka bani"aadanka oo dhan

5-Beenta calaamadaheeda aduunyada qofka loogu soo dedejiyaa inta aan aakhiro lagaarin sow ma aadan arkin qof bani"aadan ah oo qofkaas qofkii arka ku oronaayo alla hebelaa waa beenaale weynaade ee iska jir marka waa qabuul aduunyada loogu soo dajiyey.

6-Beenta waxay noqota inaad tiraahdo waxaasaa kuu sameyn hebel oo aadan yeelin ama caruurtaa tiraahdo waxaasan ku siin ee aadan siinin xitaa xoolaha nool inaad weel eber ah soo qaado oo aad uga dhigto in raashiin ku jiro lama ogola.

7-Beenta waxay kala geysaa labba qof oo is jecel.

8-Beenta waxaa sheega waa dad diinta alle ka fog oo aan qof wanaagsan ahayn (faajir).

9- Beenta rasuulka laweydiiyey oo layiri rasuulka allow qofka muslinka been masheegi karaa markaasuu yiri Mayya marka annagana waan sahlanayey arinkaas.

10 Beenta waxaa lagu tagaa naarta ee halayska ilaasho been sheegista.

Dardaarankayga waa hadii aad hadda ka hor been aad sheegtey ilaahay uga toobad keen hana sahashanin (fudeydsanin) ee alaah u noqo iskana jir in sheydaan oo xaasidkaada ah uu ku yiraahdo ninyahoow beenbaad horey usheegtey ilaahayna kaama aqbalaayo ee sheeydaan yuusan ku qayaamin wixii tagay allaah uga toobad keen inta aad faraha kula jirtana faraha kala bax dib danbana been ha u sheegin ilaahayna markasta oo adoonkiisa usoo laabto towbadda wuu ka aqbalaa towbadda albaabkeeda waa furan yahay 24 saacadood ilaa qofka mowdka kusoo xaadiro mooyaane iyo Qoraxda oo galbeed Ka soo baxda Intaas Waxaan ahayn Toowbadda allaah wuxuu aqbaal.

>Sheydaanka wuxuu yiraahdaa oo waswaas ku gashaa qofka bani"aadanka ah Beenbaad isku dhiibtey (Qaxootinimadda Yurub).

>Sheydaanka wuxuu yiraahdaa magac aadan lahayn ayaad sheegatey iyo wixii la mid ah .

Ee Eebe Weyne Haloo Noqdo Ikhwaanii Waxaan Halkaan Kusoo Guurin Doonaa Beenta Qofka Sheega In Ciqaabteeda Aduunyadda Loogu Soo Dedejiyo.

Sheeko Layaab Leh (Qiso Cajiib ah)

Qisadaan waxay ka dhacdey wadanka holand (Netherland) Magaalo ku taala koonfur bari Gobolka Gelderland waxay dhacdey sanadkii 2009 horaantiisa ilaa janaayo 2010 waxaa laga yabaa inaad isla leedahay sheeko 1 sano socotay maxatahay ogoowna qisada dhacdey wey socotaa laakiin waxaan rabaan kaliyaa inaan soo gudbay mowduucan beenta dhibkey leedahay aniga qoraalkaan qoray waxaa isoo wacay hayadda qaxootiga uu qaabilsan waxayna ii sheegeen wiil dhalinyaro soomaliyeed ee ahna qaxootiga cusub dhibaato haysato uusana garanaynin luuqadaha wadankaan looga hadlo { Dutch ama english} Meeshii tagay waxay ii sheegeen hayadii in ninkaan soomaliga ah uu jiranaayo isbitaalna ladhigay cuduro dhowr qabey cudurada sida

>Beerka oo beer hanuun lagu sheegay.

>Finanjirkiisa kasoo baxay.

>Xanuun xubinka taran ah.

Marka daawooyin la siiyey intuu isbitaalka ku jirey si xanuunada looga daaweeyo xanuun badankooda waalaga daaweyey fiinankii mooyaane marka waxaa dhacdey in wiilkii somaaliga sidii ku sugan ayaa waa dhacdey wuu indho beelay (indhoole ayuu noqdey) Ilaahay maqaadirtiisa imtixaan ayaa ku socda marka dhaqaatirtii waxay yiraahdeen ninkaan isbitaal intaan kuma jiro karo waa in guri ladejiyo loona helo dad caawiyo oo wadanka uu kasoo jeedo soomali ah la helo marka arintii waa lagu guuleystey guriyaa la dejiyey iyo dad caawiyaan dhaqaale fiican waa loo ogolaadey isagoo sidii u indho la"a ayaa waa dhacdey in ilaahay indhaha usoo celiyey maalin maalmaha kamid ah .

Dhaqaatirtii ayaa imaatey wax layaab leh ayeey ku noqotey marka ninkii waxay yiraahdeen maadama fiicantahay hadda marka waxaa laguu celin xeradii qaxootiga maadama aad caafimaadey ninkii la rabey in uu ilaah uga mahad celiyo oo indhaha usoo ceshay .(Fiiro gaar ah Waa meesha laysku dhaafey qofka ilaahay ku xiran markasta qalbigiisa ilaahay nimcooyinkiisa kama faaruqo hadii loonimceeyo allaha ugamahad ceshaa hadii nimcadii lawaayana allaah ayuu mahdin waa meesha rasuulkeena scw yiri [***Cajabal amral mu"min Ina Amruhu kulu kheyr waaye***]

Wuxuu sameeyey wuxuu dhaqaatirtii ku yiri cudurkii ayaa igu soo laabtey ee wax ma arko waana beentiisa dad soomali ayuu la tashadey waxayna kula tasheen in uu been usheego dhaqaatiirta si uu lacagtaan usii qaato wiilkii beentii uu sheegay darteed ilaahay muxuu qadarey beentii uu sheegay in indhihii araga laga qaado (Indho Beelo) Ninkiina isbitaalka ayaa lagu ceshay ayuu ku jiraa anigaana kusoo booqdey isbitaalkii welina wuu ku jiraa .

Marka waa arin yaab leh laakiin dadkeena maanta beenta waa la xalaashadey wuxuu allaah xarimay qofka caadi la noqotay waa yaab annaga soomali ahaan been in lasheego waxay noo noqotey xirfad waxaad arkeysaa Kaamamka (xerooyinak) Qaxootiga ka

buuxaan in hadii warka ay soomalida gaalada usheegayaan aad dhaqaysato walaahi waad la yaabeysaa waa been Lugo loo yeelay waa cajiib ninbaa leh oo gaalada ku oronaayo xaas ayaan qabaa mana qabo waligiisna maguursanin laakiin wuxuu u yeeli si reerkiisa yurub u yimaadaan.

>walaasheey ayaan naagteyda ku keeni Subxaanalaah

>Hooyadeeyda ayaa leeyahay anigaa qaba Subxaanalaah

Miyaaynaa ilaahay ka yabeynin , Oo aakhiro xisaab jirin ,Waxaan ku hadalney wey duuban yihiin ilaahay hortiisa latagaysaa qof walba ogoow ee intey goori goor tahay is dabaqabo.

Wixii alaah xarimay ayaan banaysanay marka ilaahay na ma bedel qolo intay ay naftoooda bedelaan soomaliyeey ilaahay halaga baqo beenta halayska dhaafo.

Ilaahaan Uga Mahad Celin الحمد لله رب العالمين Oo Ii Fududeeyey Inaan qoro **Risaaladaan Runtasheeg** oo i Waafijiyey aan Walaaladayda aan Ugu soo Gudbiyo Luuqadda Af Soomaliga Marka Waxay Khaladaad Yeelato Risaaladaan Ama Gaabinah & Luuqada Soomaliga Erayada qaarkood Aan Qeexi waayo Waxay Ka timid Nafteyda & Shaydhaan Waana Uga Toobad Keeni Allaah iyo Rasuulkeena S.c.w Bari Ayeey Kayihiin Naseexadiina Waan U Baahanahay Yaan La iga Iloobin Walaalkasto Ka Faaideysta Ama Akhristo ama Wax Kusii Daro Ilaahay (i weydiiya) iiga Barya Aniga & Labadayda Waalid & Reerkayga In Allaah na Waafijiyo Tubta Toosan & Khaatimo Toosan Aduun iyo Aakhiro Aamiin Yaarabi .

Waxaa Qorey : Walaalkiin ***Cabdiladhiif Aadan***
Akhiizubeyr_1@hotmail.com

! /! !deCE ! !! !!! š!CÊÈdeCE !!! ! !!

هذا والله أعلم
لا تنسونى بالدعاء أخوكم زبير_١